**Shirkadda Dhextaal**

## 1. WAAJIBAADKA SHAQO EE MAAMULAHA

| | |
|---|---|
| **1. Jagada** | **Maamule** |
| **2. Goobta** | **Garoowe, Puntland-Somaaliya** |
| **3. Nooca shaqo** | **Laba gelin** |
| **4. U warbixinayaa** | **Hor-joogaha/Mulkiilaha** |
| **5. Guud-mar shaqo** | Maamulaha shirkaddu wuxuu masuul ka noqon doona kor-joogtaynta iyo la socodka wax soosaarka, horumarka iyo faa'iidada shirkadda isagoo maaraynaaya shaqaalaha iyo shaqada Shirkadda. Sidoo kale wuxuu u hoggaaminayaa shaqaalaha sida mid iyaga ka mid ah oo kale oo loola jeedo in uu awood u leeyahy wadashaqayn kooxeeda. |
| **6. Waajibaadka shaqo** | *Waajibaadka shaqo ee laga rabo Maamulaha waa;*<br>• Isku xirka iyo maamulka E-mail-da, Shaqaalaha iyo Macaamiisha<br>• Shaqaalaysiinta, tabbabaridda iyo kormeeridda shaqaalaha<br>• Diyaarinta qorsha howleedka iyo hannaanka maamulka iyo maaliyadda<br>• Samaynta jaantus-cunteed (Food menu) iyo bartilmaameed maalin-iible ah (daily sales target) |

| | |
|---|---|
| | • Suuq-gaynta, Qancinta, iyo soo dhowaynta macaamiisha<br>• Dabagalka hannaan socodka shuruucda iyo siyaasadaha shirkadda<br>• Ilaalinta halbeegga cuntada, nadaafadda iyo u adeegidda macaamiisha<br>• Taabbo-gelinta xiriir joogta ah oo ka dhexeeya hiigsiga shirkadda, shaqaalaha iyo bulshada |
| **7. Xirfadda** | *Waa in uu leeyahay maamuluhu xirfadahaan soo socda;*<br>• *U adeegidda macaamiisa*<br>• *Maaraynta maamulka iyo maaliyadda*<br>• *Xirfadda gaarsiinta wixii war iyo wacaal ah*<br>• *Xirfadda kumbuyuutarka*<br>• *Xallinta khilaafaadka*<br>• *Xirfadda go'aan qaadashada*<br>• *La shaqaynta koox*<br>• *Hoggaaminta shirkadda*<br>• *Ku hadalka iyo qoridda Soomaaliga iyo Ingiriiska* |
| **8. Waaya-aragnimada** | *Waa in uu leeyahay maamuluhu waaya-aragnimo maamul ugu yaraan saddex* |
| **9. Aqoonta** | *1. Heerka 1aad Maaraynta ganacsiga (Bachelor degree BBA), Food Science and Nutrition (FN) ama Shahaado u dhigmata.*<br>*2. Dugsi sare iyo shahaado ka saraysa oo ah maaraynta ganacsiga (Diploma of Business administration )* |
| **10. Tix-raac** | Haddii aad buuxin kartid shuruudaha la iska rabo, aadna doonaysid in aad codsatid shaqadaan fadlan ku soo dir Taariikh-nololeedkaaga (CV and a cover letter) iyo 2 damiin (References) ugu danbayn **11-17/02/2018** ciwaankaan **dhextaalrestaurantandcafe@gmail.com** ama wac **0906551320** |